

# Ruqsada Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

## Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee Dabka ee Dabaq-yada iyo Dhismooyinka Qoysas badan Deeganka u ah

La Cusboonaysiiyay Maarso 2024

Xeerka Dabka wuxuu u baahan yahay dadka leh guri dhismo dabaq ah iyo goobo kale oo leh in ka badan laba guryaha deegaanka ah inay u siiyaan hagaha xaaladaha degdega ah ee dabka kiraystayaasha iyo deegaanka dhismaha.

Gaar ahaan, sida waafaqsan qaybta 403.9.2.2 ee Xeerka Dab-damiska Seattle ee 2021, mulkiilayaasha ama maamulayaasha guryaha kirada ah waa looga baahan yahay si loo horumariyo loona qaybiyo Tilmaamaha Gurmada Dabka. Tilmaamaha Gurmada Dabka ayaa bixiya shaqaalaha iyo dadka deegaanka oo wata qorshooyinka daadguraynta iyo macluumaadka ku saabsan dabka qalabka ilaalinta ee dhismaha.

Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee Dabka waa inuu kamid ahaadaa:

- Goobta, shaqada iyo isticmaalka agabka ilaalinta dabka iyo agabka, oo ay ku jiraan nidaamka digniinta dabka, digniinta qiiqa iyo dab damiyayaasha gacanta lagu qaado.
- Meesha la marayo marka xaalada degdega ah looga baxayo guri kasta iyada oo la isticmaalayo jaran jarooyinka, oo lama isticmaalayo wiishka.
- Goobta banaanka ee ay iskugu imanayaan dadka degan dhismuhu.
- Tilmaamaha dadka kirada ugu jira ee aan awoodin inay ka baxaan dhismaha iyaga oo isticmaalayo jaran jarada.

Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee Dabka waa inay ka

muuqdaan baahiyaha dadka degan dhismaha oo ayna u gaar noqdaan dhismaha.

Mulkiilaha dhismaha ama maamuluhu waa inay qiimeeyaan oo ay cusboonaysiiyaan tilmaamaha ugu yaraan hal mar sanadkii. Nuqul qorshayaasha ah waa in la siiyaa qof kasta oo kirada ugu jira marka ay usoo guuraan iyo marka isbadal lagu sameeyo.

Macluumaadkan ka khuseeyo dhismayaasha dhaadheer ee la degan yahay. Dhismayaasha dhaadheer ee la degan yahay waxay u baahan yihiin Qorshayaasha Amaanka Dabka iyo Ka Qixinta Dadka. Si aad macluumaad badan uga ogaato, ama aad u go'aamiso hadii meel gaar ah oo in la tego ay u baahan yahay qorshayaal, booqo websaytka Qorshaha Badqabka Dabka iyo Daadguraynta Dadka (Client Assistance Memo, CAM) 5051 F: [www.seattle.gov/fire/firecode](http://www.seattle.gov/fire/firecode).

Hal qaab oo Tilmaamaha Dab-damiska Xaalada Degdega ahi waxaa weeye in la diyaariyo qorshe dhulka ah oo dabaq kasta ah oo u ogolaanaysa goobta agabka ilaalinta dabka iyo kheyraadka ay heli karaan dadka deegaanku, oo ay ku jiraan nidaamka dab damiska, digniinta qiiqa iyo dab damiska gacanta lagu qaado. Qorshaha dhulka waxaa ka muuqan kara jidka xaalada degdega ah ee la marayo ee dhisme kasta.

Eeg Lifaaqa 1 ee Tilmaamaha Xaalada Degdega ah ee Dabka.

Khayraadka dheeraadka ah ee dabka iyo amaanka nolosha waxaa lagu heli karaa onleyn ahaan [www.seattle.gov/fire/safety-and-community](http://www.seattle.gov/fire/safety-and-community).

**ISKA BARI YEELIDA MASUULIYADA SHARCIGA:** Foomkaan Macluumaadka Caawimaada Macmiilka (CAM) looma adeegsan karo inuu badal u noqdo xeerarka iyo qaanuunada. Shakhsiyadka waxay mas'uul ka yahiin u -hoggaansamida dhamaan sharuudaha xeerka iyo sharciyada, haddii lagu sharaxay CAM ama haddii aan lagu sharaxin.

[www.seattle.gov/fire](http://www.seattle.gov/fire)

Fire Prevention Division  
220 3rd Avenue South  
(206) 386-1450



City of Seattle  
Fire Department

## Lifaaqa 1:

## Tusaalaha Tilmaamaha Xaalada Degdega ee Dabka

## Agabka Amaanka Dabka Dhismaha

- Dhismuhu waxa uu leeyahay jalaska dabka iyo nidaamka biyaha dab damiska ee raacsan saqafka.
- Dab damiska gacanta lagu qaado ayaa yaala dabaq kasta oo waxaana ku xiga meesha laga baxayo iyo jalaska dabka meesha laga taabanayo kuwaas oo ku yaal gidaarka jaran jarada laga baxayo agtiisa ah.

**Digniin kasta waa in loola dhaqmaa xaalad degdega ah oo dabka ah. Marka aad maqasho jalaska dab ama hadii aad dareento qiiq ama dab, waxa aad qaadaa talaabooyinkan si aad u xaqiijiso amaan uga qixida dhismaha.**

1. Waxa aad uga baxdaa dhismahaaga sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah, oo waxaad xidhaa albaadada marka aad ka baxayso. Waxa aad gujisaa jalaska digniinta dabka ee ku yaal gidaarka u dhaw meesha laga baxayo hadii aanu baxaynin jalaska digniinta dabku.
2. Isticmaal jaran jarada, oo ha isticmaalin wiishka, si aad uga baxdo dhismaha.
3. Marka aad banaanka u baxdo, waxa aad ka fogaataa dhismaha oo waxa aad qabataa meeshii loogu talo geley in lagu kulmo. Ha iskugu imanina qaybta laga soo galo dhismaha. Meesha lagu kulmayaa waxaa weeye koonaha NE ee dhulka baarkinka.
4. Hadii aad arago qiiq ama dab banaanka gurigaaga ah oo aanad isticmaali karin jaran jarada, waxa aad ku jirtaa gurigaaga. Hakuu xidhnaadaan albaabka iyo daaqaduhu. Isticmaal tuwaalo ama dhar si aad ugu gufayso albaabka ama faamalaydhka meelaha uu qiiqo kasoo galayo.
5. Marka aad ka baxdo dhismaha, haku noqon dhismaha waxay doonto ha noqoto sababtu e ilaa inta Waaxda Dabdamisku ay bixinayso ogolaanshaha in lagu noqon karo.

